

### **Waxaannu rabnaa in aannu su'aalo waydiinno qofka haysta ilmo 2.5 jir ama 5 jir ah**

Waxa ka socda Jaamacadda Göteborg daraasad ku saabsan sida noocyada taageerada hore ee daryeelka caafimaadka carruurta ee kala duwan ee waalidiinta la siiyo u saameeyaan caafimaadka iyo korriinka carruurta.

Booqashada BVC ka dib, waxa jiri doona fursad aad kaga jawaabto su'aalo ku jira foom. Su'aaluhu waxay ku saabsan yihiin adiga waalid ahaan iyo horumarka iyo caafimaadka ilmahaaga. Wuxuu foomku qaadanayaa 20 ilaa 30 daqiiqo in laga jawaabo.

Waa ikhtiyaari in laga jawaabo su'aaluhu. Jawaabahaaga iyo macluumaadkaaga iyo kan ilmahaaga waxa kaliya ee arki doona kooxda cilmi-baadhista. Natijoooyinka daraasadda waxa lagu soo bandhigi doonaa si aan cidna u ogaan waxaad ka jawaabtay.

Jawaabahaagu waxay taageeri doonaan kordhinta aqoonta ku saabsan muhiimada taageerada hore ee waalidiintu u leedahay carruurta iyo qoysaska.

Masuulka daraasaddu waa Elin Alfredsson, Jaamacadda Göteborg.

### **Miyaad haysaa su'aalo? Fadlan nala soo xidhiidh!**

Ann Jansson  
tel. 0767-60 66 90

[ann.e.jansson@vgregion.se](mailto:ann.e.jansson@vgregion.se)

Elin Alfredsson  
tel. 031-786 59 52

[elin.alfredsson@psy.gu.se](mailto:elin.alfredsson@psy.gu.se)



*Kooxda cilmi-baadhista. Bidix ilaa midig: Amina Abdullahi, Andrea Valik, Ann Jansson, Elin Alfredsson, Jeanette Olsson iyo Lisbeth Lindahl.*